## Xeerka Ciidanka Qaranka ha laga Qabyo tiro Buugga YAGLEEL ee G/Sare Injineer Maxamed Cabdillaahi Faarax Guri-barwaaqo (FANI)

Dalkeennu wuxuu soo maray duruufo kala duwan oo mid waliba wakhtigeeda iyo waayaheeda lahayd gaar ahaan illaa intii aan dib ula soo noqonnay qaranimada Somaliland. Rag iyo haween ba, halyeeyo badan oo qaar maantaba weli talinaya oo hormuud ah, qaar hawl-gabay iyo rag badan oo maanta innaga hooseeya Allah haw naxariistee heerkasta iyo xilkasta oo ay ugu soo shaqeeyeen ba qaranka, ayaa sida runta ah ka sokow dadaalka guud ee shacabka, iyagu tacab badan, tamar iyo wakhtba ba usoo huray dhismaha qarankan iyo inuu dalkani soo gaadho halka uu maanta joogo ee leh dawladnimada, qaranimada, dimuqraadiyadda iyo nabadgelyada aan haysanno ee laga yaabo inaanay dhalinyaro badani xog ogaal u ahayn sooyaalkeeda, loona baahan yahay in la ilaaliyo, la kaydiiyo taariikhda, lana baro jiilasha yaryar.

Dabayaaqadii 1993, Madaxweynihii hore ee JSL Allah Haw Naxariistee **Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal**, wuxuu magacaabay saddex guddi oo soo diyaariya, kana soo talo bixiya dhismaha saddexda ciidan ee uu ka kooban yahay Ciidanka Difaaca Qaranka JSL. Madaxweyne-ku-xigeenkii hore JSL Mudane **Cabdiraxmaan Aw Cali Farah,** ayaa sidoo kale qaabilsanaa difaaca qaranka, Wasaaradda Gaashaan-dhigguna ma lahayn wasiir ee waxaa u sarreeyay wasiir-ku-xigeen markaas ahaa Allah haw naxariistee **Xasan Guure Jaamac,** halka uu **Cabdillaahi Xuseen Iimaan (Darawal)** na ahaa abaanduulaha ciidanka qaranka.

Allah haw naxariistee **Gaashaanle sare Injineer Maxamed Cabdillaahi Faarax Guri-barwaaqo (FANI)** oo aan xilligaas ka tirsanayn wasaaradda gaashaan-dhigga, balse ka gaadhay darajooyinka gaashaanle sare iyo mihnadda injineernimo aqoonta ciidamada cirka iyo diyaaradaha dagaalka, ayaa guddoomiye looga dhigay gaar ahaan guddidii loo magacaabay ka soo talo bixinta ciidanka cirka iyo difaaca cirka. Sida ku qoran hordhaca buuggiisa, markii uu isagu dhamaystiray talo bixintii qaybtii loo diray ee ciidanka cirka, wuxuu sidoo kale ka hawlgalay qaybihii kale maadaama oo duruufaha qallafsanaa ee xilligaas jiray aanay saamaxaynin inay guddiyadu sidii loo baahnaa u wada hawlgalaan. Wuxuu ugu horrayn sameeyay astaamaha ciidamada ee maanta lagu dhaqmo, kuwaasoo isla wakhtigaaba la dhaqu dhaqmay, waxaana isla markaa ku dhalatay qoraagga baahida loo qabay inuu sii wado hawsha, kana diyaariyo buug habraac iyo hage u noqda dhismaha iyo dhisme-hoosaadyada ciidamada qaranka. Waxaanu bilaabay buugga YAGLEEL ee aan qormadan kaga hadlayno markii loo magacaabay xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gaashaan-dhigga 1994. Wuxuu la tashaday dhammaan raggii lagu tuhmayay aqoonta ciidan ee ciidanka qaranka dhulka iyo badda ba, waxaanu dhamaystiray qabyo-qoraalkii koowaad 2004, taasoo ka dhigan inuu waday muddo toban sano ka badan,

Isla sannadkaas 2004, wuxuu u gudbiyay shaqada uu qabtay 2004 Madaxweynihii hore JSL **Mudane Daahir Riyaale Kaahin**, madaxweynuhuna wuxuu isla wakhtigaa ba u saaray guddiyo dib u eega oo waxka bedel iyo kaabis ku sameeya meelaha u baahan nuxurka ku duuggan buugga Guddiyadaasi waxay isugu jireen saraakiishii ciidamada ee markaas hawlgashanaa iyo raggii

hore uga tirsanaan jirayba ciidamadii Soomaaliya, kuwaasoo aqoon, khibrad iyo waayo aragnimo shaqo u lahaa arrimaha ciidamada kala duwan ee difaaca dhulka ama barriga, badda iyo cirka.

Guddiyadii loo saaray dib u eegista buuggu, waxay soo jeediyeen waxka bedel iyo kaabis meelaha qaar nuxurka buugga, qoraaguna wuu ku dabbaqay dhammaystirkii buugga, waxaanu sidaas ku soo afmeeray diyaarinta buiugga YAGLEEL ee qaab-dhismeedka iyo dhisme hoosaadyada ciidamada qaranka sannadkii 2004.

Allah haw naxariistee, **G/Sare Injineer Fani** oo ahaa agaasimihii guud ee ugu muddo xileedka dheeraa Wasaaradda Gaashaan-dhigga Somaliland, isagoo weli haya xilka, kana warwarsan inaan weli lagu wada dhaqmin buugga ciidanka ee YAGLEEL ee uu kusoo dhabar jabay, ayuu geeriyooday 2008, waxaanu ku sii dardaarmay inaanay khasaare noqonin aqoonta ku duugan buuggan dhaxalgalka ah, laguna  dadaalo in looga faa'iideeyo qaranka haddii ay tahay bixinta darajooyinka ciidamada iyo haddii ay tahay cilmiga kale ee uu xambaarsan yahay ee qaranku u baahan yahay in loo raaco samaynta xeerarka sharci ee ciidamada qaranka, siyaasado maamul iyo hawl-gelineed ba xagga arrimaha maamulka iyo maaraynta ciidamada qaranka.

**Waa maxay nuxurka Buugga YAGLEEL, maxaa ku qoran ama uu ka jawaabayaa?**

Buuggu wuxuu si farshaxanimo iyo aqoon sare leh uga jawaabayaa dhammaan arrimaha muhiimka ah ee la xidhiidha maamulka iyo maaraynta hawlaha ciidamada qalabka sida sida: dhismaha iyo qorista, qaab-dhismeedka, dhisme-hoosaadyada, astaamaha, dirayska, billadaha, shuruudaha bixinta darajooyinka iyo qiimaynta ciidamada qalabka sida, jaantusyo, waajibaadyo iyo nuxur badan oo tilmaamo iyo habraacyo la xidhiidha arrimaha ciidamada qalabka sida ee saddexda ciidan ee ciidanka difaaca dhulka uu qoraagu u bixiyay ciidanka lugta, ciidanka badda iyo ciidanka cirka iyo sidoo kale ciidanka bilayska iyo ciidanka asluubta Jamhuuriyadda Somaliland.

**Maxaa laga isticmaalay ee ka hirgalay ubucda Buugga YAGLEEL illaa hadda?**

Marka laga reebo astaamaha iyo calamada ciidamada qaranka, bilayska iyo asluubta oo iyaga isla xilligaas uu **Madaxweyne Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal** u saaray gaar ahaan sannadkii xigay ba ee 1994 lagu dhaqmay iyo darajooyinka ciidamada ee la bixiyay xilligii Madaxweyne Maxamed Axmed Maxamuud (Siilaanyo) 2013, dhammaan qaybaha kale ee nuxurka buugga iyo aqoonta uu xambaarsan yahay waa mid dihin, loona baahan yahay in lagu dhaqo ciidamada.

Sannad-guuradii 19aad ee aasaaska Ciidanka Qaranka JSL sannadkii 2013 uu Madaxweynihii hore JSL Mudane Axmed Maxamed Maxamuud (Siilaanyo) ku taxay darajooyinka taliyayaashii ugu sarreeyay ciidamada qalabka sida, taasoo markaas lagu bilaabay bixinta darajooyinka, waxaa ka mid ahaa masuuliyiintii ka hadashay munaasibaddaas Allah haw naxariistee Wasiirkii hore ee Gaashaan-dhigga JSL, Mudane Axmed Xaaji Cali Cadami, waxaana ka mid ahaa erayadiisii: "Waxaan ka daba gaynayaa (hadalkayga) oo aan xusayaa, nin muwaadin ah oo reer Somaliland u dhashay oo isaguna wakhtiyo hore derejadaa ku fekeray. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gaashaan-dhigga buu ahaan jiray **Injineer Maxamed Cabdillaahi Fani** baa la odhan jiray. Ilaahay haw naxariisto. Inankiisii baa hadda aan shaqada qorray shaqadii  u horaysay ee cid ay wasaaraddu qaadato, si aan qofka loo illaawin oo loo xuso wixii wanaagsanaa ee uu sameeyay oo

ay tahay wax rikoodhka ugu jira ummaduna u ogtahay xitaa haddii qofku geeriyooday, wixii isaga ka soo jeedana lagu abaalmariyo https://www.youtube.com/watch?v=nF-kyXa0pW4"

**Maxaa looga faa'iidaysan karaa Buugga YAGLEEL samaynta Xeerka Ciidanka Qaranka?**

Kollay xeerarku waa shuruuc guud oo aan si qotodheer ugu talax tegin inay ka hadlaan waxbadan oo arrimo farsamo ah oo siyaasado maamul iyo hawl-fulineed iyo habraacyo kale lagu soo saari karo. Hase ahaatee, waxaa hubaal ah inay ku jiraan waxbadan oo wakhti, xog ururin, daraasayn iyo wadatashiyo lala yeesho cidda aqoonta khaaska ah u leh (*Subject matter experts*), isla markaana ka maqan xeerka ay maanta isku khilaafeen ansixintiisa Golaha Wakiillada ee uu Shir Guddoonku dib ugu dhigay hal maalin.

Waxaa xusid mudan inay ka qaybqaateen oo ay talooyin dhiirrrigelin ba ku lahaa sida qoraagu ku xusay mahadnaqqa buugga, rag badan oo taliyayaal, taliyayaal ku xigeenno, abaanduulayaal, madax-hoggaamo iyo ku xigeenno, sarreeyayaal, wasiirro, wasiirro ku xigeenno, siyaasiyiin, xildhibaanno, masuuliyiin iyo rag badan oo isugu jira qaar maantaba nool ay qaarkood ka tirsan yihiin goleyaasha qaranka ama aanay xilal haynin, rag haatan hawlgab yihiin iyo xubno Allah haw naxariistee qaarkood geeriyoodeen, qaar ka geeri horreeyay iyo rag isaga kadib geeriyooday ba. Waxaan ugu ducaynaynaa intii innaga baxday in Ilaahay u naxariisto, inta nool na waxaan u rajaynaynaa inay ku waaraan caafimaad qab. Hadaba iyadoo aan ka cudur daaranayo, kana raalligelinayo akhristayaasha qormadan, in aanan xilalkii ay markaas hayeen iyo darajooyinkoodii raacinin sida ay ugu qoran yihiin buugga, taasoo aan uga ujeedo inaanu qoraalku innagu sii dheeraan, waxaa ka mid ahaa raggaas: Cabdillaahi Xuseen Iimaan (Darawal), Xasan Cali Abokor, Maxamed Cali Cumar, Maxamed Cali Yuusuf (Maydhax), Cumar Maxamed Nimcaale, Axmed Cali Maxamed (Tansaani), Axmed Maxamed Siciid (Karandash), Faarax Nadiif, Xasan Guure Jaamac, Aaden Maxamed Mire Waqaf, Maxamed Cali Abokor, Maxamed Cismaan Abokor (Cayuun), Yuusuf Cabdi Yuusuf (Yuusuf-weyne), Maxamed Cabdi Aden, Cabdillaahi Gamgam, Cismaan Cawad Xaashi (Dacas), Ismaaciil Maxamed Shaqalle, Maxamed Cali Fooji, Axmed Xasan Jibriil, Axmed Xasan Abokor, Maxamed Cabdi Maxamuud (Qamariye), Maxamed Jibriil, Cabdillaahi Axmed Cige, Cismaan Xasan Xaaji Hindi, Cumar Jaamac Cumar, Maxamed Haybe, Cabdi Suldaan Maxamuud Nuur, Cismaan Jibriil Xagar, Cilmi Rooble Furre, Maxamed Warsame (Dhagaweyne), Cabdilqaadir Muuse Maxamed, Maxamed Shiil Dhidar, Siciid Ciise Quraxay, Axmed Cali Cige, Yuusuf Cabdi Oday, Cali Maygaag, Cabdi Maxamed Saxardiid (Cabdi-dhibboo), Maxamed Cabdi Warsame (Fadhi-ku-salaan), Maxamed Cige Cilmi, Cismaan Xasan Caalin, Dubbe Cilmi Ducaale, Ibraahim Caydiid, Maxamed Cabdi Shiine (Shiine-faqash), Xasan Cabdi Yuusuf, Aaden Cabdi Diiriye, Maxamed Axmed ismaaciil, Cabdiraxmaan Cabdillaahi Bedel, Axmed Cawaale Yuusuf (Libaax), Daahir Cali Wacays, Axmed Maxamed Casoowe, Maxamed Jaamac Aaden Baraar iyo Rashiid Mustafe Xasan.

Sidaa darteed, waxaan usoo jeedinayaa Shir Guddoonka Golaha Wakiillada JSL inay guddi dambe u saaraan qabyo-tirka Ciidanka Qaranka oo ay wakhti fiican siiyaan in laga baaraan dego, lagala tashado cidda aqoonta leh ee ciidamada qalabka sida iyo dadka kaleba leh, isla markaana fiiro gaar ah la siiyo nuxurka lagaga dabbaqi karo xeerka Buugga YAGLEEL.

Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa in Allah haw naxariistee G/sare Injineer Maxamed Cabdillaahi Faarax Guri-barwaaqo (FANI) loogu magac daro meel u qalanta aayaha iyo dhaxalka uu uga tegay qarankiisa awgeed sida mid ka mid ah kulliyadaha tababarka ciidamada qalabka sida ee cusub ama iman doonaa, kulliyadda tababarka ciidanka difaaca cirka JSL, taallo loo sameeyo iyo ama wax muhiim ah oo lagu xuso, laguna xasuusto doorkii geesinimada iyo waddaniyadda lahaa uu Mujaahidkani ka soo qaatay dhismaha qarankiisa gaar ahaan arrimaha ciidamada qalabka sida ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh

**Xasan Axmed Yuusuf**
**hafgaab@gmail.com**
**Hargeysa, Jamhuuriyadda Somaliland**
**September 26th 2023**